Maurice Roberts

# MA NAQAANAA ILAAH?

# MA NAQAANAA ILAAH?

MAURICE ROBERTS

MERF Ethiopia

+251-929-107261

## MA NAQAANAA ILAAH?

Dunida waxay u qaybsan tahay laba kooxoood – kuwa yaqaana Ilaah iyo kuwa aan aqoonin Ilaah. Waxaa kale oo jira dadyow kale oo aad u kala duwan, laakiinse kala duwanaantan waa midda ugu weyn. Dan ka gallid la'aanta Ilaah waxay si qoto dheer saameyn ugu yeelataa siyaaabaha aan u fekerno, shaqayno, iyo ku noolaashaha guud ahaan nolosha.In badan weliba, aan u dhiman doono iyo waxa inagu dhici doona dhimashada ka dib. Waa suuragal inaan wax ka bedelno maskaxdeenna waxyaabaha ku saabsan Ilaah. Malaayiin qof baan sidaa sameeya. Waxayna ka bilaabaan nolosha inyar, ama wax dan ah ineyba ka lahayn wax walba oo ku saabsan diimaha. Laakiin, waxay wax ka bedelaan fekredoodii waxayna bilaabaan, oo ay bilaabeen dadka intiisa badan garaadka in diinta iyo Ilaah aysan iyaga khuseynba. Laakiinse waxay helen iyaga qudhooda, siday doontaba ha ahaatee inaan la ruxi karin ka dareenka gudaha jiritaanka Ilaahay iyo wuxuu kula hadlay qalbiyadooda iyo damiirkoodaba.

Waa suuragal garashada Ilaah shakhsi ahaan oo aad ku rumeysid ilsbedelka nolosha iyo waaya aragnimada ku timaadda markaannu fahanno in rumeysadaka la'aanta iyo rumeysnaanta in Ilaah jirinba (Mulxidnimada) – Ilaahlaawanimada iney yihiin wax khaldan. Mana jeclin inaan qirano inaan waa keliya oo hore khaldanayn oo inla mara hbaaabiyey.

Laakiinse, tani waa mid ku dhacda marwalba kuwa helay Ilaah oo rumeystay Isaga. Weyna ka xumaadaan iney nolosha ku bilaabeen rumeysad la'aan. Waxayna jeclaan lahaayeen caruurnimadoodii iyo

dhalinyaranimadoodii in dib loogu soo celiyo, taasoo ay ku noolaan lahaayeen caruurnimadoodii nolo wanaagsan oo aad u wacan. Sidaa oo kale haddii aan u dhigno waxay inaga qudheena ina soo xus-uusineysa inteeena badan , guur ahaan xilligi sanadihii kureynima-deena, khaladaadyo waweyn oo naga dhacay oo dhibaato ina geliy-ey. Qaar waxay uga koraan durbadiiba sanadaha hore si wanaagsan, laakiinse dabvadeed waxaa isaga dhe qasma dhibaatooyin iyo qar-soodi ka dib soo wajahda nolosha. Inkastoo dadku aysan xaqiiqsan taasi, sabata runta ahna ay ula kulmayaan dhibaatooyinkaasina wax-ay si dhaw ugu xiran tahay in badan oo ku saabsan asaasiga iyo dhibaatada joogtada ah - Ma yaqaniin Ilaah.

Inaga oo idil wakhtiyada qaar waxaan ku fekernaa in dunida aan ku noolnahay saday doontaba ha ahaatee. Wa maxay sababta ay dadku aysan mid walbaba midkale ugu naxariisan? Maxaa sabab u ah dagaaladan arxanka daran oo iska socda qarniyo badan taa-riikhda bani'aadanka? Maxaa sabab u ah dembiyada, arxan darada, xadgudubyada, aflagaaddada iyo caayda, furiinka iyo kala go'idda? Maxaa saba u ah faqriga gaajada (macluusha) iyo cudurada dunidan dusheeda ka jira?

Waa sida ay tahay waxaa suuragal ah iney su'aalahan maskaxdaada isweyddiiso oo ay ku duugan tahay madaxeenna ku jira ciidda. Na-siib xumadan weyn dadka dadka iniisa badan waxba kama bartaan ee dhincan nolosha u wajahan. Sida joogtada ah. Waa inoo nacasn-imo haddii aan ka hor- iman weyno xaqiiqadan dhabta ah. Maxaase sabab u ah waxyaalahan badan ee cajiibka ah ee ka jira dunida aa-laaba wax ka khaldan yihiin? Tani waa su'aal wanagsan oo dhinac aan ka bilowno leh: sidee baan si cad oo la fahmi karo ugu sharxi

karnaa ama ugu qeexi karnaa inay jirto xumaan hoos u qoto dheer oo ku saabsan dunidan?

Jawaabta rumeystalaawayaasha waxay tahay: taasi waxau tahay un qaabka nolosha sida ay tahay oo adigu waxa kama qaban kartid waxyaabahaa. Laakiinse middani waa gun dhaw oo haadaan ah, fekerka guuldaraystaha. Runtii waxaa jira si kale oo loo yidhaahdo, ma jecli su'aashan, oo kutala galkeyguna waa inaan ogaal diido oo in badan ku noqdaa waxyaalaha i raalligalinaya oo naftayda u raaxeeya. Sidan bay waabasha la'aan ugu jawaabaan rumeystalaawayaasha su'aashan oo weliba waa danaeyste qoto dheer oo natiisa un ka hormariya waxwalba, weyna garnayaan in duida leedahay kumnaan dhibaatooyin, laakiinse ma doonayaan iney qasgaliyaan farxaddooda iyo fikirkooda iyo sida ay tahay axwaasha dadka kale. middani daneystenimada keliya ma aha, Laakiinse waa dayuusnimo. Mar dhow iyomar dambaba mid walba oo inaga mid ah inaga mid ah inaga wuxuu wajahayaa xaalado halis ah.

Caafimaad ahaan baa xumaan karta, ama saaxiibkeen la weyn doonaa, ama halisa weyn baa inagu wada dhici karta, waxaannu

wajihii doonaa dhimasho iyo qabri.

Bal aan idiin sheego waxyaabaha soo maray Aabbahay waaguu dhalilnyarada ahaa. Sababta aan u soo qaatayna waa mid muhiim u ah mowduucan.

Aabhahay oo markii da'diisu ahayd labaatan jir baa cudurka qaaxada ku dhacday (Tuberculosis). Dhakhtar baan la dhigay isgoo aad u liita una taagdaran. Toddobaad walbana bukaano ay isku qol jiifaan

baa dhiman jiray oo loo qaadi jiray qololka maydka lagu keydiyo. Naxariista alle wuu ka badbaaday aabbahay oo in badan buu ku noolaa nolol farxad leh iyo cimri dheerid caafimaad leh. Laakiin isu wada geeyoo waaya-aragnimadiisii intuu dhakhtar dhkhtarka yaalay wuxuu bartay cashar aad u qiima badan – taas oo ahayd markii uu bukay oo aad ugu baahnaa badnaa waxaa jiray wadaaddo diimeed oo soo booqan jiray isaga iyo dadkii kale ee isaga la midka ahaa. Isaga qudhiisa waagaa iyada ahayd aad uma sii rumeysmeyn Ilaah, inkasta oo markii dambe nolosha uu ku soo noqday. Laakiinse weligii ma uusan iloobin casharkaa. Qofka marka ay dhibaato haysato ayuu caadiyan xusuustaa oo uu gartaa Ilaah caawimaad iyo naxariisna ka fishaa. Waxaasina waa waxa aabbahay u soo baxday iney dadku isbedelaan markay gartaan Ilaah. Markii aad aaminto waxaad noqonaysaa qof ka duwan kii aad horey u ahaan jirtay. Bal aan u sharaxno sidan oo kale. qof walboo Ilaah la kulmo wuxuu noqonayaa sidii ‘ Daabacaad’ cusub ka duwan shakhsigiisii hore ka naf ahaan. Oo la micno ah sida buug horey loo qoray oo gaboobay deedna markale dib loo daabacay sidiisii. Oo noqday mid cusub oo ka wanaagsan kii duugga ahaa. Waana qaabka dadka helaa Ilaah uga duwanaadaan dhan walba oo aad ka eegtid, oo marwalbana ku hoggaamisaa maxsuul isku mid ah.

Laakiinse, waa xaggee meesha ay tahay inuu ka bilaabo haddii ay doonayaan iney gartaan Ilaah? Waxay ka bilaabataa maqlidda waxa Ilaah uu inagu leeyahay ama uu noo sheegayo oo uu inagu dhiirrigelinayo inaan Isaga I nimaadno. Ilaahna wuxuu ku yidhi kuwa doonaya oo uu jeclaaday Isaga oo si niyadsan u doon doona ay heli doonaan Isaga. Doondoonista Ilaah micnaheeda waxaa weeyaan rabitaanka lagu hawoodo garashada Ilaah. Waxa cajiibka ah waxa uu

yahay in Ilaah qudhiisa uu isu muujinayo kuwa ay runt aka tahay ee doonaya Isaga. Rumeysad la'aantiinii hore iyo nacasnimadeennii hore inagama hor joogsan karto haddii aan leenahay niyad san oo sax ah oo aan rabitaankayagu yahay inaan helno Ilaah iyo naxariistiisa. Maxaane u baryi la'nahay isla iminka si aan u weyddiisato inuu isku kaa muujiyo adiga?

## MAXAY TAHAY MICNAHEEDU WAAN BADBAADNAY?

Garshada Ilaah baa ah 'Badbaadada' marka aan lenahay sidaasi waxay ula mid tahay qofkaa bani'aadmiga ah, inuu ka mid yahay kuwa u yimid iney yaqaaniin Ilaah, oo u baahan 'Badbaado'. Middani waxy ka turjumeysaa waxaanu horey u soo sheegnay in dunida loo sameeyey laba nooc oo dadka ka mid ah, kuwa yaqaqana Ilaah iyo kuwa an aqoonin. Waxaanu caddeyneynaa middan ku jirtas waddo kale oo odhanaysa dasdku waxayna isug jiraan kuwa badbaaday iyo kuwa aan badbaadeynin. Marka aan ka hadlayno waxyaalaha ku saabsan kuwa badbaaday ma aha inaan ku soo halqabsano kan hagagsan ama xushmadda leh ama 'sida fiican u nool', laakiin dadka ku hoos jira isbedelka ruuxa noloshooda. Isbedelkan laga yaabaa iney u ekaadaan sidii dhallaan, ama sida u dhexeysa muddada ciyaalnimada iyo qaangaarnimada, ama xilliyadan dambe ee nolosha. Mana wada aha kuwa ku dhex korey kaniisadda ama xudhamadda ku dhex socda isbedelka qaabka noloshooda u badnaan ama ugu yaraan. Haddadba maxay tahay micno waan badbaaday? Middani waa tan ugu muhuumsan ku saabsan diinta. Waana su'aas-

ha ugu halisasan ee aan isweyddiin karno laakiin intaan ka jawaabin su'aashan waxaa haoon inaan wajahno xaqiiqda jirta oo ah waxyaalaha jira ee u baahan inaan ka fekerno waxa ku saabsan ereyga ah Badbaado. Sababta shey keliya, ma jeclin inaan ka hadalno shey aan u baahanahay oo aynan haysanin.

Si aan la ogeyna u waxyeelayo nabaddeena. Mar baynu dooneynaa inaan nidhaahno, ' waxaan ahay sidii qof wanaagsan sidiisii qofkayga xiga ee aan u baahneynn waxbababa'. Ama haddiise falcelinteenna aheyn fekradda badbaadada, waxynu badanaaba dareenaa xasilooni la'aan iyo cadho badan. Falcellintani waa mid caadi ah oo la fahmi karo. Badbaadadu waa mowduuc ka carreysiineysa sheekooyinka dadka ka qoslasiisa ee TV yada ee bandhigyada lagu wado doodda goobaha fagaarayaasha dadweynaha kuwada kulmaan. Waxaasoo idil waa duufsasho ama wax aad u xun oo kaa leexinaya waddadii haboonayd inaad ka joogsatid oo tidhaahdid 'tani teyda ma aha'. Laakiin waa u nacsnimo inuusan qofkaa garanin waxa ay tahay fekredda badbaadada micno.

Ereyga badbaadada waxaa loo isticmaalaa diinta oo la micne ah qof laga soo furtay khatar aad u weyn oo daaha laga qaaday sababta oo ah khaladdaadkii aanu horey ugu soo galnay nolosheenii. Si fududna haddii aan u dhigno oo sahlan, waa sidatan: Waxaa ingu waajibay dhimashada ka dibna inaan wajahayno ciqaabta ku saabsan wax walba oo khaldanaa bilowgii ilaa ugu dambayntii ee aan ku samaynay nolosheenii markaan dhulkan joognay tani waa ta mid walba oo naga mid ah runteeda ogyahay haddii laga reebo mid dhowrsan mooyaane, ama badbaaday.nolosha arladan waxay daba socotaa nolosha aakhiro. Anaga haddii aynu nahay bani'aadmiga, waxaanu u soconaa inaan ku noolaano nolosha weligeeda ah ka dib markay-

nun dhimano tani ma aha runta u sugnaanaysa xoolaha ama xayawaanka bahaahinka ah, laakiinse waa xaqiiqda ragga iyo dumarka u ahaan doonta.Bani'aadanka wuxuu leeyahay naf ama ruuxa nolosha, xayawanka se malaha. Marka ay xoolaha dhintaan mesha ayay ku idlaadaan: Markase bani'aadanku dhinto wuxuu ku noolaadaa duni kale, nafta jidhka wey ka baxdaa oo waxay gashaa oo aaddaa nolosha abiddiyanta ah. Waxyaalaha khaldan kuma garan karno noloshan, haddii aan anagu dhowrsanaan, waxeyna ahan doontaa maxsuulka dhibaatada waxyaalaha qarsoon ee u iman doonta nolosha soo socota. Sidaas awgeed, inaga oo idil waxaan u baahannahay - doonddonidda inaan ka badbaadno xaaldaha soo noqnoqda ee aan inagu waxyaalaha xunxun ama khaldan aan ku smayno. Middani oo inooga dhigan inaga micno ahaan inaan badbaadnay. Waxey tahay, sida waxaanu soo nidhi inyar kolkii horeba, wxa ugu daran iney tahay. Keliya nacaska ayaa ku kaftama waxyaalahan ku saabsan mowduucan. Laga yaabee inaad tidhaahdo

'Ma aan maqlin weligey waxbarriddan hadda ka hor.' Si muruga leh, waxaa jira in badan xitaa dadka aada kaniisadda, oo aan heysanin ama aqoon mowduuca badbaadada weyna u caddeysay iyaga. Maxaa wacay, waxey u samaysaa kala duwanaanta oo idil markaan ka eegno xagga nolosha ku jirta iftiinka ee baahideena inaan badbaadno. Haddii aan hindhisno, ama aan tiriirn, geerida, deedna oo ay kala ahaato inaan si wanaagsan u noolaano dhamaan damaca iyo farxaddaba iminka aan joogno. Laakiin haddii aan xaqiiqsano iney hjirto nolol ka dambaysa nolosha hadda aan ku sugunahay, oo ah midda aan ku wajihi doono ciqabta u haata xumaanteeena sharka leh oo idil iyo ereyada, dababeed waxeynu bilownaa inaan u aragno nolosha gabigeedaba waddo ka duwan. Inaan doonddono baahiyada

waa tallaabada ugu horreysa ee naa ku badbaadeyno si aan u helno badbaadada. Baahida degdegga ah ee ugu muhiimsan ee ina haysata waxay tahay inta ka horreysa inaan badbaadno waxaa weeyaan marka hore inaan garanno ama ogaano khatarta aan ku jirno. Ciise Masiix sidan buu u dhigay una tilmaamay ka masala/tusaale ahaan. Wuxuuna yidhi cidna/qofna dhakhtar uma tago isaga oo caafimaad qaba oo ladan. Waa marka aan garano oo aan ogaano inaan jiranahay ama bukno weeye markaan ku fikirno inaan dhakhtar booqanno. Middani waa dhabta jirka buka. Waana waa wax dhab ah qofka marka uu arko baahida uu u qabo inuu badbaado. Garashada baahideena ayaa ah badbaadada laga badbaadayo ee caawimaadda cajiibka ah. Waana wax ka bedelidda jidka aan ku fekerno mar keliya. Kuwa aan arag baahidooda ku noolaashaha badbaada ku aadan noloshan. Sharaxaadana waa sida ay tahay iminka sida bulshada aan ku dhex noolnahay xaalkeeda yahay.waxa ugu weyn ee xoogga la saarana waa sidii lagu heli lahlaa lacag un oo loo iibsan lahaa waxyaalo badan oo badan. Waa baadigoobka farxadda. Laakiinse maxay tahay doonista wanagsan ee inooo hageysa nolosha weligeed ah? Xitaa waxaa dhici kara dunida waxa ku jira oo idil inaan leenahay uma wanaaagsana waxna uma tareyso, waxna kama qaban karto maalintaa qiyaamo, sababta oo ah kulligeen waannu ka wada dhiman doonaa oo aan ku soconaa abid dhamaadaka daaa'inka ah iyo halkii loo badnaa.

Si kale haddii aan hadalka u nidhaahno , dhibaatda nolosha iyo waaya aragnimada adag ee qaxarka leh kol dhow wey iska idlaan doonaan oo wey iska dhamaanaysaa, haddii aan badbaadno waxaan si degdegsan u hanan doonaa wanaagga duni barakaysan oo loogu yeedho janno.aragtida taqni wxey tahay aragtdida noloshan aan ku

jirno waa waxba yahay dhab ahaantii marka loo eego haddiyadaha badbaadada. Kitaabka Qudduuska ayaa ugu yeedha badbaadada, haddaba, "Waa shayga loogu baahi badan yahay" waana sheyga keliya ee khuseeya dhamaadka. Fekerka maskaxdeena laga ayaaba iney ku soo dhacdo sidatan, maxay tahay sababta dad badani aysan u xiiseyneynin mowduucan khuseeya badbaadinta? Jawaabtse waxay tahay waan cabsanayaa, midan laga xumaado. Waxaana weeyaan sababta dadka intiisa badanwkhti wanaagsan bay la tahaya iney heystaan xilligan iminka ah.waxayna diyaargareysanayaan khatarta mustaqbalkooda. Sababta oo ah waxey u arkaan wax aad u fog iney tahay. Laakiin tani waa nacasnimo iyo taxadar la'aan. Caqliga caaqilka rag iyo dumar kuu doonoba ha ahaadee wuxuu odhan doonaa "waa inaan badbaado oo aan aadaa janadaa" deedna gala kuna noolaadaa nolol raaligelin ah, oo aan lumiyaa nafteyda ilaa iyo aakhirka dunidan. Marka aan sidaa u hadalno waxey la mid tahay inaga oo qaadnay tallaabadii ugu horreysay ee aan ku beegsanaynay badbaaadada.

## SIDEE BAY KU WANAAGSAN TAHAY INAAN NOQONNO?

Janada inaan helno waa inagu waajib, siday doontaba ha ahaatee, waa wax wanaagsan. Waa wax iska cad oo uu qofwalba fahmi karo in janada ay u wanaagsan tahay dadka. Tan baana ina hortaagan su'aasheeda: sidee ugu wanaagsan ee aan ku tagi karnaa janada? Waxaa jira siyaabo badan oo lagu heli karo jawaabteeda. Laakiin jawaabta runta ah waxaa weeye iney waajib tahay wanaagga hagaajinta sabaabta oo ah ineysan waxba ka dhineyn oo aam wax intaa ka yar la samayn karin. Sii fiicneynta oo la micne ah inaad dambiga laguu heysto iska baruyeeshidoo dhamaystiran. Gelidda janada waaan u baahanahay inaan khalad lahayn, ceeb iyo cilad lahayn, oo nadiif ku ah indhaha Ilaah hortooda. Waa kuma xaakinka weyn ee ugu dambaynta dadka oo idil kala xukumi doono.Waxaa jira laba waddo oo suuragal ah oo ay dadka ku gaari karaan waxay rabaan oo ah hagaajin nadiifsan. Waan iney yeeshaan qudhooda iney isnadiifiyaan, ama sida ay atahay oo kale helaan haddiyad qof kale ugu yabooha daahirindtooda oo nadiifiyo iyaga. Suuragal saddexaad ma jiro. Wanaagna waa inuu ahaadaa halka shey ee aan ku heli karno waxa aan istaahilno iyo dadaalkeenma, ama waa inaan helnaa haddiyad uu qof kale ina siiyo, qofkaas oo ah qof wanaagan ku siinayo oo haddiyad bilaash ahna ruux kale. Halkani waxaa jira dad inta badan ku socda khalad marka ay bilaabayaan xiiseynta diinta. Marka aan ka hadlayno wanaagga ku jira dareenka waxaa waajib inagu ah inaan isticmalno ereygan "Xaqnimada" bal aannu eegno sababteeda. Ereyga xaqnimo wuxuu ku saxan yahayin loo isticmaalo marka aannu joogno heerka saree e wanaagga ku quman Ilaahayaga ah xaakinka, waxa uu inaga doonayey inaaan yeelnay. Xaqnimadu micnaheeda waxaa weeyaan heerka gaaridda qofka addeeciddiisa uu ku qanacsan yahay xaakinka. Haddii aan gaarno heerkan waxaan shee-

gan doonnaa “Xaqnimo” iyo “Barakadeen” oo weliba waxaa nalagu soo dhaweynayaa janada weligeed. Haddii aan si kale u nidhaahno, haddii aan ka dhacno ama aan yeeli weyno wixii laynaga doonayay heerkeeda addeecidda wixii uu Ilaaha xaakinkeena inaga codsaday inaan yeelno iniaga, waxaynu noqoneynaa ugu dambeynta “kuwa aan xaq ahayn” oo “Inkaaran”. Waxaa inoo ahaatay dhacdadaa aw-geed, in laynaga saaro gudaha xaadirnimada Ilaaha samada.

Sababta oo ah qaddarka mustaqbalkeena waa ugu badnaantiisa khu-seysa mowduucan aan ka hadlayno. Waxaa inagu waajib ah inaan si qoto dheer uga fekerno sidee baan ku heleynaa xaqnimada dhawr-san oo hubineysa farxadda. Nolosha sanmada (Janada) ugu dam-beynta (Akhirkii).eegidda iyo ka jawaabidda su’aashan waxaa ina-gu qasab ah inaan isu diyaarino waxyaabo aad isu hooseysiin u ah inaan is nidhahno. Ma jiro mid inaga mid ah oo ku dhashay wanaag iyo xaqnimo. Middaa midda ka soo horjeedda wxay tahay inaga oo idil waxaan ku soo dhalanay shar, middana ma soo dhaweyney-so warbixina xogta dadyow badan, noolaha ku yidhi, ka soo noqda mowduuca diimeed gbi ahaantiiba. Waxaa xun.  Waxeyna leeyhiin fikrad sare oo iyaga qudhooda u kaxeysa dhanka xun ama khaldan. Marka lagu leeyahay iyag waxey yihiin dad aad u xun oo guracan.

Laakiin si wanaagsan buu inoo sameeyey inaan ka barano runta iaaga inagu saabsanoo oo uu Ilaahay inoo arko. Ilaah wuxuu inoo sheegaa inaga waxa ugu xun ee ugu liita ee nagu saabsan anaga qudheenna, mana aha micno naxariis la’aan, laakiin wx ka baxsan doonista jaca-ylka nalugu sameeyey wanaag weyn, haddii keliya ee aan dhagay-sano waxa uu inagu leeyahay eebbaha. Ereyga aannu isticmaalay qeexidda ragga iyo dumarkaba oo aynu ognahay micno iney tahay

“Dembiilayaal”. Middani micno kuma lihin inay kulligood yihiin dembiilayaal aan mudneyn in loo naxariisto, lakiin dhamaanteen waanu k a dhacnay oo gaariweynay heerkii wanaagga wanaagga ee ku horqumanaa Ilaahayaga ina abuurtay ahna xaakinka. Dad badan isla toosan ama isla saxan, muxtarim ah ama hufan oo daacad ah. Mararka qaar waxey jilaan dad sharaf weyn mudan oo darajo leh, deeqsiyiin ah, oo weliba dhaqan wanaag jacayl soo jiidasha leh. In dembiilayaal loogu yeesho dadkaas kama dhigna in la dafiray tayadooda fiican ee ay leeyihiin. In la yidhaahdo sidaa, xiqdiga – naca, xumaanta iyo canaadka waxyaalaha idil ee tayada wanaagsan leh, kama dhigeyso inay wanaagsanaadaan sida ay ahayd inay ahaadaan. Waa “Dembiile” kii ka gaabiyey ee gaadhi waayey heerka uu Ilaah ka doonayay inuu ahaado oo uu inaga doonayay inaga oo idil. Xukuumadda ilaah dhexdeeda, sidaa daraadeed, dhamaanteen waxaannu nahay dembiilayaal. Mid xaqa ma jiro midnaba ama adeecid daacad leh. Qayb ka mid ah heerka sare ee uu inoo dhigay Ilaah oo ahayd inaan u ahaano inaga oo idil, inaan jeclaano dadkayaga inala midka ah oo aan ku sii jeclaano oo aan xanaaneyno sida aan u jecelnahay inaga nafteena oo kale. Fikraddan iminka joogta waxay inoo sheegeysaa inaan weligeen sidaasoo kale abid samaeyn.

Haddaba waxaa inagu haboon oo inagu quman waa inaan samayno. Haddii aan nacam wanagsan nahay oo aan odhan karno xaq baynu nahay – waa inaan jeclaanaa deriskeena oo aan u jeclanaa sidan naftayada u jecel nahay. Waa inaan jeclaanaa iyaga ka dareen ahaan in aan samayno. Waxaa inagu waaibay inaan jeclaanaa iyaga waa dadkee dareenka inaan wanaag u samayno kulligood intii karaangayaga ah. waa in aan weligayaga u haynin naxaris la’aan inakasta oo mararka qaar afkayaga ka soo baxaan ereyo naxariis la’aan ah, oo aan loo baahnayn. Laakiinse ma jiro qof bani’adan ah oo ilaalin

kara heerka uu ka dhigay Ilaah ee uu u qaabeeyey bilogiiba. Ugu yaraan, ma jiro qof taas sameeyey oo noolaa oo ilaaliyey heerkii uu Ilaah u qaabeeyey. Dib baan ugu soo laaban doonaa qodobkaasi inyar ka dib. Waa dhacdo ay tahay ineysan jirin qof bani'aadan ah oo abid noolaa oo ilaaliyey ama dhawray daahirsanaanta Ilaah ee uu dadka ka doonayay ee wanaagga iyo jacaylka xambaarsan mid mooyee! Siday doonataba ha ahaatee dadkii wanaagsanaa ee aan la kulanay dhamaantood waxey ahaayeen "Dembiilayaal" kuwa ka dhacay oo addeeci waayay amaradii Ilaah na siiyey iney deriskooda u jecladaan sida ay iyagu isu jecel yihiin oo kale. Sabataas awgeed Ayaan ku caddeyn karnaa inay u ahatay Dembiilayaal. Laakiin in badan baan ka odhan karnaa. Waxaa intaas dheer qaybta heerka hoos yaal ee Ilaah inoogu sheegay waajib iney nagu tahay inaad Ilaah ka jeclaato qalbigaaga iyo naftaad iyo mankaaga oo idil. Taa micnaheeda waxaa weeye inaan u qaabeysanahay oo uu Isaga inoo sameeyey qof muhiim ahmiyad sare u leh nolosheena. Waxaannu ku khasban nahay inay ina farxad geliso maskaxdeena ka fekerka Ilaah, caabudiddiisa maalin walba inaan caabudno, inan samayno waxa uu doonistiisa inoogu muujiyey inaan addeecno mid walba oo ka mid ah amaradiisa, oo iyada oo gaaban eegno farxad gelintiisa suurtagal walba inaan ku jeclaano qalbigeenna oo idil Ilaah oo ah micnaheeda inaan jeclaano waxwalba oo uu Ilaah jecel yahay, oo wax ka hooseeya aysan jirin. Si kale haddii aan u dhigno jeclow Ilaah waxey la mid tahay – jeclow Ilaah waxa uu jecel yahay, oo necbow waxa uu Ilaah neceb yahay. Waa inaad uga mahad celisaa dhamaan waxa uu ku siiyo, oo aad ku qanacsanaataa. Waa suurtagal xaq ah oo sababaysan waxa uu Ilaah inoogu diyaariyey xagga sare ee samada. Wuu ina abuuray oo nolol buu ina siiyey. Waa xaakinka kuwa uu heerka gaarka u qoondeeyey. Waxynu nahay abuuritaankiisa, oo loo

hawl geliyey inay sameeyaan wixii uu faray. Laga yaabee, dadka ineysan jecleysan dareenka xadeynta iney ku sameeyaan wixii laga doonayay ee uu Ilaah sharcigiisa faray. Laakiin middani ma mahad-inin mana samaynayso xitaa ugu yaraan tusaale iyaga mark alga eego waajibaaadka addeecidda dhawrsan.

Kuwa cawaaka ah iyo kuwa aaminsan inaan la sugi karin jiritaanka Ilaah (Atheist, and Agnostics) waxay la mid yihiin oo ay ku khaas-ban yihiin iney addeecaan Ilaah sida dadka kale oo idil ay u ahaatay ama yihiinba. Waa wax cad waxa aannu horey u soo niodhi, oo rajo kama qabno gebi ahaanba dadkoo dhan wanaag ku filan Ilaah hortii-sa inaan samayno taas oo aan muteysan naftayada. Howl adag kuma keensan karno kumana tagi karno karti aannu leenayay janada. Waxaan u baahanahay in nala siiyo xaqnimo deeq oo ka timaadda ka keliya ee awoodda inaw siiya inaga.

## CARUURTA ILAAH SOW MA WADA NIHIN?

Jawaabta saxda ah ee su'aashan dusha ku qoran waa: Haa iyo Maya. Waxaa soo idilna waxay ku xiran tahay waxad ula jeedo micno nax-wa ahaanteeda – "Caruurta Ilaah". wey khaldanaan kartaa laakiin-ninkastoo ay caadi tahay sida looga fekero waxyaabaha khuseeya ama ku saabsan mowduucan laga yaabee inaad sida ereyadan u dhig-to: "Aabbihii uunka Ilaah iyo AAbbihii uunka walaalaha ee dadka" Dad badan bay la tahay ama uma maleeyaba su'aashan la'aanteeda in haddii Ilaah ina abuuray inag deedna uu ku khasban yahay inuu Aabbe inoo noqdo oo ay ku waajibanto inaan caruurtiisa nahay ama noqono. Laakiin middan weyna maran habaabinaysaa. Qodobkaana

wuxuu u baahan yahay in la sharxo. Waxaa jira dareen ah in dadka oo idil yihiin caruurta Ilaah. Haddaba dareenkaa oo idil baa ah in bani'aadanka oo idil uu Ilaah abuuray rag iyo dumarba oo loo habeeyey si gaar ah oo ka duwan xayawaanka iyo . Caqli baan leenahay, doonis, qiiro, damiir, xiska iyo miyirka Ilaah, oo u ahaatay inaan caabudno Isaga.fekradda guud ee abid daa'inka ah ee waaraya weligii, dareenka garashada wanaagga iyo xumaanta – iwm. Waa wax iska cad oo la fahmi karo in dirka bani'aadanka waxaa loo abuuray haddiyado, awood maskaxeed iyo nafta inagu jirta inaga aad u tayo sareysa markii loo eego caqliga xayawaanka waaweyn, waxaan ku qwxi karnaa taasi nagoo leh in ragga iyo dumarka laga abuuray "U ekaanta" Ilaah. Haddaba dareenkan ma aha mid aan khaldanayn markaan leenahay waxaynu nahay Caruurta Ilaah.

Laaskiin dareenka dareenka dhamaystiran wxaynuu noqoneynaa caruurta Ilaah marka keliya ee aan garano Ilaaha ina badbaadshay. Xaqna uma lihin inaan kekerni Ilaah inuu Eebbaheena samada ku jira ilaa aynu noqono kuwa rumeystay Ciise Masiix. Waaana waxa ugu muhiimsan ee aan fahmi karno middan. Markii uu Ciise MAsiix dadka baray una bayaamiyey Ilaah inuu inoo yahay Eebbaheena! Sidaa buu sameeyey marar badan iney u qaataan markii la xareynayey kuwii doonayey Ciise inuu u ahaado badbaadiyahooda ama u aaminsan badbaadiyaha. Laakiin dabiici ahaan gidigeen waa neceb nahay Ilaah, saaxiib iyo ubadka Ilaahna ma nihin. Sida uu Ilaah inoo arko intii ka horreysay markaanu labisneyn qamiiskii xaqnimada, waa sharaf jabiney oo xurmeyn weynay ISaga. Tiro dhawr shey oo run ah ayaa jira oo ku saabsan xiriirka ingala dhaxeeya anaga iyo Ilaah intaan rumeysan ka hor. Waxaa jira cadh uu inoo qabo Ilaah, Isagana aan ku ceebeyney, wuuna inooga digay falkaa inaan sa-

maynin kolkeedii horeba. Xogtas halaagga inagu soo socda haddii aan ka toobadkeenin. Xaakino ayuu inoo soo diray tiro mar iyo lababa ka badan. Waan calool xumeyney oo tiiraanyeenay markii laga eego dabeecadheennii xunxumaa, waan canshuurnay dulqaadkiisii. Waan aflagaadeyney wanaaggiisii. Waannu dulminay Isaga oo ka careysiinay. Aad bay isaga caddahay in Ilaah uusan inoo ahaynAabbaha samada intaas in ka badan inta uu xidhiidhka anaga iyo Isaga inaga dhexeeya uu xun yahay.marka aan sidaa leeyahay wawli waa wax run ah in Ilaah yahay naxariiste iyo qulqaate inoo samra xitaa marka aanu calool xumeyno oo aan kga xanaajino dambiyadeena iyo xadgudubyadena.  Halkaa isagoo ka sii socda waa Ilaahiye, badanaa in aad u sii badan wuxuu ina tusaa naxariis iyo wanaag inaga nolosheena xitaa marka aan ceebeyno oo xurmad jabino. Ilaah wuxuu ina tusaa oo ina saameysa toobadda aanu Isaga ugu soo noqonno. Xaqiiqda la yaabjka leh ee marwalba waa wxa Isaga farxad gelisa, naxariis iyo diyaargarow sare inuu cafis bixiyo ama uu ina cafiyio.

Middani wuxuu sameeyaa marka aannu si ishooseysiin leh qudhayada aan u weyddisanno saamxaaad (Cafis) iyo nimco. Waxaa jira laba sababood oo aad u wanaagsan sababta aan inaga u dooneyno inaan noqono caruurta Ilaah inagoo aaminsan rumeysadka Ciise Masiix. Hal shey dartii haddii aynan ahayn caruurta wanaagsan ee Ilaah, haddaba waxeynu nahay caruurta s, shayddaanka, sabataa darteed ayuu Ciise Masiix u yidhi, dadka qaarkood buu ‘shayddaanku aabbe’ u yahay. Laga yaabee inay naga nixiso fikraddaa, laakiin falcelinta waxey ina tusi doontaa iney middan sax tahay. Haddii ay nolosheena xuntahay oo aad ay u guracan tahay ma odhan karno caruurta Ilaah baan nahay, laakiin shayddaanka.

Kuwa ah caruurta Ilaahwanaag bay sameeyaan oo ka turjumeysa

kana muuqata dabeecadda Ilaah. Haddii ay diintayada inaga inagu samaynin jacel, naxariis, iyo wanaag ma noqon karto diin ka timid Ilaah oo uu inoo muujiyey inaga. Faafidda naxariis-darada ama beenta, ama cabsida iyo dhimashada waa camalada sheyddaaanka, oo kuwa sameeya shuquladan uma laha xaq ay ku yidhaahdaan waxeynu nahay caruurta Ilaah. Laakiinse waxaa jira sabab kale oo ah waxeynu doonaynaa ineynu noqono caruurta Ilaah. Sababta waxaa weeye Ilaah ballamadiisa barakooyinka ahaa ee uu uga ballan qaaday inuu ku abaal marinayo kuwa caruurtiisa ah. Wuxuu kula balamay iyaga iney yihiin kuwuu jeclaaday nolosheena ay farxad ku waari doonaan nolosha iman doonta. Waa kuma kana an dooneynin in la barakeeyo oo la barwaaqeeyo. Maxayse tahay barakada ee uu Ilaah kala balamay kuwa aaminsan rumeysadka Masiix iney u yihiin sida caruurtiisa?

Si aan jawaab buuxda u helno su'aashan waxaa inagu waajib ah barashada Kitaabka Qudduuska oo ah ka muujiyey garaadka iyo doonista Ilaah. Kitaabka Qudduuska waxaa ka buuxa ballamo uu Ilaah inoo sameeyey marka aan rumeysad la imaano. Laakiin jawaabta kooban waxey tahay Ilaaha ballanta na siiyey inag nimco nagu filan buu inagu caawiyaa maalin walba oo ugu noolnahay dunidan, iyo weliba Isagu waa Ilaahiye ballamada uu ina siiyey meesha ah meesha maamusan ugu dambeynta gurigiisa samada., taasi waxay qeexeysaa sida jiritaanka ahaansho iney la mid tahay guri balaaran oo qolol loogu ta;aga;y rumeystayaasha oo idil leh. Ballamadiisana waxaa ku jira waxa ugu wanaagsan oo aan la qiyaasi karin. Waxyaalahan waxaa weeye nabad iyo farxad iminka degan qalbiyadeena, ku dhacdayna dareenka jaceylkiisa, oo maalin walba maalinta ku xigta sii kordhaysa. Dunidan waxaa u imanaya amaan u eg sida qoraxda, dayaxa iyo xiddigaha. Qoraa aad loo yaqaano

oo ka mid ah qoraayada loogu jecelyahay bulshada MAsiixiyiinta dhexdeeda John Bunyan, ayaa aad u sharxay farqiga am kala diwanaanshaha u hdaxeysa farxadda dunida iyo farxadda aakhira ee xagga samada sare, waxaadna ka heli kartaa buugiisa lagu magacaabo "*Pilgrim's Progress*". "Nin qol ku jira ayaa indhihiisa keliya hoos u jeedaan iyo qudhunna gacantiisay ku jiraan. Inta ka sareysa madaxiisana waxaa istaagan nin kale oo taajkii boqortooyada gacanta ku heysta, oo siinaya taajka ninkii hore oo kaga bedeaaya wasakhdii qudhunka ahayd. Laakiin ninka nacaska ah ma eegayo umana dhug laha umana soo jeedo, laakiin wuxuu isga sii socdaa dhuuntii wasakhda qudhunkeeda, dhawr ulood, iyo boodhkii sagxadda dhulka.

John Bunyan waddadiisa cad, halkaa bay inagu tusaysaa kala duwanaanta u dhaxeysa waxa uu Ilaahina siiyo haddii aan noqono caruurtiisa ruuxiga ah oo ah waxa dadkan dunidan helayaan noloshooda adduunka cabsida leh ka dib. Middani waa run dhameystiran. Inaan ku noolaano dunida wakhtil xaadirka oo aan urusano waxyaalaha wanaagsan oo idil oo aan ka fiicneyn boodhka qashin qubka dhuumahiisa qudhunku galo ama ka soo baxa.laakiin haddii aan doondoono Ilaah oo aannoqono xubnaha qoyskiiisa, waxaan heli doonaa taajka amaanta ugu dambeynta oo cidina naga qaadi karin.

## YAA INA SIIYA XAQNIMADA?

Hadii ay tahay ama ay inagu waajibtay inaan lahaano dhawrsanaanta xaqnimada si aan u badbaadno oo ay ina deeqdo janada yaa ina siiyey inaga xaqnimadaasi? Middani weeye inaan u soo jeedsano mowduucan falanqayntiisa. Sida dambiilayaasha oo k ale inaga qudheenna isma siin karno xaqnimada. Midnaba wadaaddi, ama malaa'go. Siday doontaba ha u wanaagsanaato waxa ina siiya caqbalaadda Ilaah. Wanaag kastoo ay leeyihiin iyagaa isu baahan qudhooda. waxba uma hayaan kuwa kale. Suurtagalna uma aha malaa'igaha iyo wadaaddadaba ka siyaadin ama dhaafiyaan wixii Ilaah ka rabay iyaga. Haaddaba wax dheeraad ah oo ay inaga qaadi karaan ma jirto. Tani waa wadnaha ama udub dhexaadkeena ka dembiilayaal. Wax aan u suuroobin weeye dadka – si layaab leh u yidhaahdo – waa u suurtagal Ilaah wuuna karaa. Halkan waxaan idinkugu haynaa akhbaarta wanaagsan. Ilaah qudhiisa ayaa siiya dadka oo idil dhawrsanaanta xaqnimada. Waa laynagu casuumay u tagidda Ilaah. taasi waa inaan weyddiisanaa keliya. Xaqnimada waxey la mid tahay khamiis ama go' mara ah oo lagu deday qaawanaanteenii oo dabooleysa ama dedaysa dembiilanimadeeenii iyo dembigiiba. Kuwa helay go'an ama khamiiskan xaqnimada kuna xirtay iminka noloshan, oo weligood wey xirnaan doonaan ilaa iyo aakhiro weligeed. Middani waa kal duwanaanshaha u dhexeeya diinta been abuurka ah iyo ta runta ah. noocyo diimeedka been abuurka ah waxay dadka baraan iney iyaga sameeyeen qudhooda waxyaalo wanwanaagsan oo ku filan Ilaah. Diinta runta ah se dadka waxey u sheegtaa rajo dhigid ku aadan dhamaan xitaa kuwa xaq iska dhiga qudhooda iyo kuwan doondooa inuu Ilaah siiyo xaqnimada kaas oo si bilaash ah ku siiya dhamaan kuwa weyddiista. Waad hubin kartaa adigu qud-

haada. Siday doontaba dadaal badn isku samayso soo jiidashada Ilaah in ku filan. Waxaa kuu soo baxaya inaadan gaari karin oo aad ka dhaceyso.

Sababteedana waxaa weeye wax walba oo wanaageena ah kuma filnaaneyso weligeed Ilaah. lakiinse, u tag Ilaah oo ka bari – aad-na u bari inuu ku siiyo haddiyadda xaqnimada, oo markaa waxaad heli doontaa garashada kala duwanaanta. Sida aan u dareeno weeye waxa qalbiyadeena iyo garashadeena ku jira. Waana nabad hoos u qota dheer, iyo xaqiijinta aan ku hagaagsan nahay Ilaah hortiisa, oo waayo aragnimadeeda baa ina raaligelineysa, oo waxaa jira buugaag fara badan oo inoo sheega sida ay dadka u heleen waayo aragnima-diisa ugu fiican oo aan ku karno inaan ku maareyno nolosheenna weeye. Dad badan ayaa isku daya inay soo saartaan wawayo-ar-animada noocyadeeda maalmahan; noocyada kala jaadjaadka ah ee maandooriyayaasha lagu helo ayaa ka sareysa meesha. Laakiin ma jiro midna waxyaalahan inuu lala barbar dhigo midda farxadda, nabadda iyo caymiska gudaha qofka ku jira marka qofku ku hagaag-san yahay Ilaah hortiisa. Inaad heshid ku hagaagsanaata Ilaah waa khibradda ina bedesha weligeed. Waa khibrad adduun iyo mid aakh-iro. Waa mid ina raaligelisa oo ku hdameystiran ku qanciddeeda oo inoo sameyneyso wanaag aan la mid ahayn cabid iyo mukhaadaraad toona – inooma sameyso haba yaraatee wax waxyeela ah. Waa wax asal ahaan daruuri tahay fahmiddeeda sida uu Ilaah u irsaaqo dadki-isa. Haddiyadahan xaqnimada eek u saabsan waxa aan ka hadlayno haddiyaddan ma aha sidii wax uu (*abuuray*) maalintii uu abuuray dunida iyo waxa ku jira dhulka. Ugu dhawaan ilaa iyo xad, waxaa loo keenay jiraha s cajiib ah ooh awl Ilaahna lagu sameeyey shakh-si gaar ah eek u jirta taariikhda bani-aadanak. Ilaaha Aabbaha ah

du dunida wuxuu u soo diray wiilkiisa Ciise Masiix laba Kun iyo dheeraad sanadood ka hor Ciise wuxuu u yimid inuu inagu badbaadiyo dhawrista sharciga oo uu ugu dhintay iskutallaabta dusheeda inaga darteen. Noloshiisana daahir bay ahayd boqolkiiba boqol oo wax iin iyo dembi uu lahaa mijirin. Dhimashadiisianan waxey ahayd Allabari, hurid ama u bixin nafsadeed. Oo u hurtayn nafaf kale. Jacaylka uu inoo qaboayuu u soo diray dunida MAsiixa inuu inoo sameeyo wax aan inaga karin qudheenna.

Kuma noolin nolosha xaqnimada; laakiin Ciise Masiix ayaa sameeyey. Ilaahna kuma qancin karno heerka xaqnimadiisa; laakiintaasi Ciise Masiix ayaa sameeyey. Dibna uma sixi karno dembiyadeenii iyo gegfafkeenii; lakiin Ciise Masiix baa sidaa sameeyey. Intuu sidaa samaynayey Masiix wuxuu shaqadeeda banaanka keenay xaqnimada daahirsan oo sababtay Masiixa waa Wiilka Ilaah xaqnimadan waa ma dhamaato qiimo sare u leh Ilaaha Aabbaha ah. noloshii iyo dhimashadii Ciise oo iswata waxey abuurtay hal macaamil oo weyn oo taas baa Ilaah raalligelisay, daadinta dhiigiisa, iyo weliba dhamaystirka xaqnimada sharciga Ilaah sida mid inoo ah wakiilbedelkeeniba qaatay. Ma fahmi karno sida aan ku noqonay kuwa xaq ah hadii aanan arkeyn ruuxa uu yahay Ciise ee aan u mahad naqin oo aan raali ka noqan una maqsuudin waxa uu inoo sameeyey inaga. Qof caadi ah oo inaga oo kale ah ma uusan ahayn Ciise, wuxuu ahaa qof Ilaah ah. sida Wiilka Ilaah Isagana wuxuu qaatay jidh bani'aadinimo, deedna siduu ugu istaago wakiilashda iyo bedelaadda inaga. Wuxuu ku noolaa nolol aan iin lahayn iyo wax dembi ah midna oo daah irsan Osagoo inaga wakil ah. Wuxuu ku dhintay dhamasho nafhrid ah sidii bedelkeena. Noloshiisa iyo dhimashadiisaba waxey ahayd lagama maarmaan si walbaba.noloshiisii daahirsaneyd ee uu ku noolaan jiray ayay ahayd ta ina 'Siisay'inaga ama, haddii aad

jeceshahay, si rasmi ah laynoogu magacaabay inaga wakiilnimadiisa ama daljire. Geerida nafhuriddiisa uu ku dhintay ayaa raalligelisay caddaaladda Ilaah u gefiddii aan u gafnay Rabbiga. Gafkeennii ka bani'aadmi ahaan Ayaan halka uga jeednaa micno ahaan in aan Ilaah aflagaadeynay oo aan ka cadhaysiinay oo keentay ka aadmi ahaan markaan addeeci weynay inaan ku caasinay bilowgiiba. Laakiin dhimashadii Ciise waxey bixisay ama u u baxay qaantii ay dembiyadeena ay ku hor galeen caddaaladda dhawrsan ee Ilaah. Xaqnimada sidaa daraadeed, ma bilaash buu iangu siiyaa inaga mise taasi waa mid aan ku helnay noloshii iyo geeridii Ciise Masiix! Bal aan ku eegno barxaddan mid ama laba shey oo muhiim ah. Sidee baan ku garan karaa xaqnimada Masiix iney igu filan tahay oo uu igu aqbalay Ilaah? Jawaabta waxaa weeye: Ilaah wuxuu ka soo sare kiciyey Masiix geeridii maalintii sadexaad ka dib markii mootanaa oo uu ku dhintay iskutallaabta dusheedii. Haddii an Masiix soo sare kci lahayn, rajo maynu lahaanayn. Laakiinse Ilaah baa ka soo sare kiciyey Masiix geeridii oo inoo xaqiijiyey dhamaanteen in aan xaqnimadaa ku helnay Masiix, taasi waxay buuxisay ama dhamaystirtay abidiyan wax ku filan oo uu inoogu keeno inaga Ilaah.

Sidee baan ku heli karnaa xaqnimada daahirsan? Helidda barakadan cajiibka ah waa wax asaasi oo daruuri inaga dhigaya dhamaanteen fikirkeena wax qiimo leh. Ilaah wuxuuinga dalbanayaa oo keliya intan: Rumeysad, rumyesad baan ku heli karnaa haddiyaddda uu Ilaah inagu siinayo xaqnimada oo rumeysad baan ugu iman karnaa xaqnimada oo weliba ku geli karnaa xaaladda qumanaanta ee hore markii aadmiga la buuray ka dib aan kula joognay Ilaah. Sida caadiga ah dadaka waxay dareemaan wax lala yaabo markii ay maqlaan farriintan. Inaad heshid wax bilaash ah oo aadan waxba bixin waxey

u ektahay sidii wax khiyaameen! Ugu yaraan Ilaah wx ma ugu celin karnaa inaan siino waxoogaa shaqo wanaagsan ah oo aan inaga qudheenna u samayno? Maya! Waa ineynu taasi isku dayin inaan samayno – oo midan baa sabab wanaagsan u ah. Haddii aan kareynoo inaan 'Bixino' haddiyadan Ilaah waxaan bilaabaynaa inaan isku faanino waxyaalahan ku saabsan xaqiiqda. Waxaasoo idil waxaa ka sareeya, MAsiix inuu inoo bixiyey qiimihii - oo dhamaystiran.

## NOLOL MA JIRTAA GEERIDA KA DIB?

Waa wax iska caadi ah dadku iney isweyddiiyaan iney jirto wax ka baxsan nolol ka dambeysa geeridda. Waxaas oo idil, waxaa inagu waajib ah inaan dhimano kolkey doontadaba ha ahaatee ha soo degdegto ama ha soo raagtabe. Waana nacasnimo inaan ka daboolno maskaxdeena mowduucan ah mid aad muhiim u ah. dhinac kale, waxey saameyn ku leedahay oo ay saameysaa jidka ama sida aan u noolnahay iminka. Haddii ay inoo caddahay garashada ama aqoonta aan ku ognahay waxyaalaha ku saabsan nolosha ka dib. Si kale haddii aan u nidhaahno, ku noolaashaha jaahilnimada nolosha ka dib – dhimashada oo la micne ah in sidaa ay ku idlaaneyso xaalada rajo beel ah oo ka timid oo aan kaga baxsanayno haddii keliya un nalaga qaatay taxadarak ficilka wakhtigan. Waddada ama sida aan u sharxi karno waa inaan sidaan u fekernaa sidii guri gubanaya oo kale. Haddii uu kolka dabka qabsado guriga ay soo jeedaanaan dadkiisa, waa macquul iney helaan fursad ay kaga baxsadaan dabka isla wakhtigaa. Laakiin haddii ay hurdaan, ad bay ugu badan tahay iney ku wada dhintaan ama ku bas beelaan dabkaasi. Middani waxey la mid tahay ama tahayba dacwadda mareka ay timaaddo noloshan ka

dib ama markii la dhinto ka dib. Haddii aan si sax ah u ognahay ama aan u naqaano waxa soo socda oo lala kulmi doono geerida ka dib waa inaan isku diyaarinaa taa iyada ah. Laakiin, haddii aanan ka warqabinba waxa soo socda oo inaga horreeya xiliga geerida waa inaan si adag ugu diyaar gorwnaa oo aan filanaa taa ina soo wajahi doonta.

Tusaalae masaalka ah waa mid sax ah. Middanina wa mid asaasi ah oo lagama maarmaan inoo ah inaga oo idil inaan ogaano waxyaalaha ku saabsan dhamaan rag iyo dumarba qiimey u leeyihiin. Nolosha geerida ka dambaysa waxey ahaan doontaa shey farxad leh. Kala duwanaanta iyo isbedelka waa wax tixraac leh "Geerida" oo la micne ah in nafsaddu ka baxeyso jidhka qofka oo ay galeyso 'janada' ama aadayso samada. Haddaba jidhka qofka waxaa la geliyaa naxashka meydka oo waxaa lagu aasaa ciidda dhulkla hoostiisa. Inta hawlaha duugta lagu jiro, marka dhacayso, waa wax daka ay ka siman yihiin iney yidhaahdaan "Waa Ciid ku noqotay Ciidda" ama dambas ku noqwday dambaska (Ciid baa laga abuuray Ciid buuna/bayna ku noqotay ka Somali ahaan). Waxaasoo kale ku hadaaqaan. Taasi waxey ina xusuusinaysaa in jidhka dadak markii horeba laga abuuray Ciidda dhulka, awoodda Ilahna ku ahaatay, taasoo ahayd noloshan jidhkeena arlada, oo ku noqotay "Ciidda" oo imanka la aasayo. Aad bayna u mihiimsan tahay jidhkeena wax ku dhacayo inaan ogaano, oo weliba ogaano waxa ku dhacay nafsaddeena. Dacwadda kuwa dhintay ee rumeysadka lahaa, nafsaddooda kolkiiba waxey u muuqaneysaa xaadirnimada Ilaah, iyo janada Ciise Masiix. Noloshan nafsadda waxey ku dhex nooshahay jidhka, laakiin geerida ka dib wey 'Qaawantahay' ama waa 'jidh la'aan' micno jidhka kuma jirto oo waa keligeed, oo waxey galeysaa jidh la'aan meeshii loogu talagalay waa naftiye, xaalda nabdoon iyo nasasho

ka dib dabeyshii wareerka badnayd ee noloshii soo martay. Geeri barakeysan, sida aan ugu yeedhno inaga. Iminkana waa qudduus daahirsan. Dhamaan daciifnimadii, ciladdii iyo naaqusnimadii iyo dembiyadeedii gebi ahaan wey ka dhamaadeen oo wey ka gudubtay wixii soo maray oo idil. Xaaladdeedana waa qalbi saafi ah iyo dembi la'aan. Geerida dhexdeeda xiskooda wey qabaan oo waxey ku raaxeysanayaan wada jirka wehelnimada farxadda leh ee Ilaah iyo Masiix, iyo malaa'igaha iyo dhamaan quduusiintii geeriyootay.

Siday doontaba ha ahaatee, inkastoo geerida barkadaysan ay qudduus saafi iyo nabaadin tahay, iiyagu weli ma aysan gaadhin meeshii ugu dambeysey dhamaystirkeedii, iyagu weli ma helin jidhkoodii, haddaba geeridii barakadeysneyd  waxey eegeysaa xagga hore ilaa ugu dambeynta dunidan markii jidhadhka oo idil loo soo celilyo iyaga.  Wakhtigaa ay dhaceyso waxaa keliya oo og Ilaah xilligeeda ama saacaddeeda. Markii saacaddaa si rasmi ah u timaaddo, oo buunka weyn uu yeedho ama dhawaaqo oo dadkii geeriyooday oo idil laga soo sare kiciyo dhulka hoostiisa iyo badaha gudohooda – waxey ku xiran tahay hadba meeshii geeridaa ku saxneyd. Jidhka quduus walba waxaa ku soo noqon doona nafsaddiisii. Jidhkana iminka wuxuu u nuuri doonaa sida iftiinka qoraxda ookale. Mid walba oo ahaa rumeyste oo la soo sarekiciyey wuxuu la kulmayaa Ciise Masiix oo ku jira daruuraha dhexdooda sidii isagoo u imanaya inuu kala xukumo dadka oo idil ee abid noolaa dhammaantood. Xukunka xaqnimadana waxaa lagu ixtiraamaami/sharfi doonaa Masiix deedna loo keeni doonaa isaga in la cusbooneyso uunka, oo lagu fasiro sidii 'Samooyin cusub iyo dhul cusub' Middani ugu dambeyntii lagu geliyey rumeystaha gurigii Ilaah. Ilaahna halkaa wuu joogi doonaa weligii

iyo weligiiba. Farxaddaasina waaa mid jidbeysan, ku qanacsanaan toodana wey dhammeystiran tahay, oo reynreyntoodana wey iska sii soconeysaa abaddiyan tan iyo weligeed. Waxaana lagu abaalmarin doonaa adeegyadii iyo rumeysadkii ay Masiixa ugu hibeeyeen itii ay dunida joogeen. Abaalkan wuxuu ka tirtiri doonaa illintii iyo ka xumaanshihii hore noloshan ay iminka ku jiraan. Dhibaatooyinkii oo idil iminka iminka gebi ahaan wuu ka idlaaday oo dhib dambe uma jiri doono.

Laga yaabee inaan ku fekerno samada xaaladaha samada, deedna, marka aan u imaano kuwa rumeysan Ilaah waxaan u kala qaadi doonaa labo masraxood; xilliga geerida iyo ka dib sarekicidda. Waxaan ka tixraaci karnaa xiligii geerida bakadeysneyd iyo xilligi u dhexeysay geeridad iyio soo sarakicidda. Sidaasoo ah xilliga dhex. Xilliga rumeystayaasha inta ka dambaysa sarakicidda iyo xukunka waxey halqabsaneysaa ama tixraac u tahay sidii xilliga xaaladda ugu dambeysa oo kale.

Laakiin waa maxay xaalladda kuwa aan rumeysadka lahayn? Su'aashan wxey inoo keeneysaa inaan u wajahno waji ka waji dhab ahaan mowduucan ku jira diinta. Ka dib geerida rumeysaalawaasha waxey gashaa xaaladda ama duruufta dhexe ee ciqaabta naarta. Halkan waxaa lagu ciqaabi doonaa oo ku sii waarayaan xanuun, xog aan la garanayn lana qiyaasi karin oo qarsoon iyo ciqaab joogta ah oo u ahaatay ilaa dunida ay ka idlaanayso. Jihka qof walba oo aan rumeysad lahayn waa la soo sarakiicin doonaa isla wakhtigaa, kuwa xaqnimada leh lala soo sarakicin doonaa iyagana. Laakiin jidhka xumaan falayaashii waxaa lagu dhex tuuri doonaa muuqasho.

Xukunka ka dibna waxaa loo dieri doonaa oo ay weligood ku waari

doonaan xaaladda ugu dambeysa ee cadaabta. Halkaana waa lagu ciqaabi doonaa weligood oo dhibta xanuunka daran ayaa naftooda iyo jidhkoodaba u haan doonta. Ciise masiix in badan buu ka hadlay meeshan naarta ah oo in badan wax inooga digay. Wuxuu inagula murmay inaan isu siyaarino geerida oo aan ka toobad keeno dembiyadeena oo aan rumeysano Isaga inuu inoo ahaado Badbaadiyaheena iyo Sayidkeena iyo RABbigeenaba. Naarto waa meel iyo xaalad qarsoon oo aan cidna ka baxsan karin. Ilaahna u abuuray sidii xabsi ama jeel. Halkan kuwa Ilaah ku caasiyey ee waddooyinkii noloshoodii dunida ay xumeyd ayey waajib tahay iney ku silcaan khaladaadkii ay sameeyeen awgeed. Sababta ay naarta ugu waarayaan weligood oo aysan dhamaadka u lahayn waxaa weeye sababta dembiga aan sharkiisu dhamaadka lahayn oo aan kaa hareyn ilaa keliya ilaa inta aad ku jirto noloshan maanta dunida dusheeda aadan ka toobadkeento mooyaane oo aadan rumeysan Sayid Ciise Masiix. Waxaa jira gabay caan ah oo loogu yeedho ‘Dante’ mar uu qoray iney dhamaatay geliddii naarta ereyadan ah ‘Waa rajio-beel ka soo noqosho aan lahayn kan galay meesha.’ Inkastoo Dante uusn ahayn qoraa loo soo waxyiyey, haddana tani fikrad quman oo aad tixraac hoose oo dhab ah u leh. Kuwa galay naarta rajo ma laha, sababta oo ah ciqaabtooda waa mid dhamaasho lahayn oo abid weligeed ah.

Middani waa sababta uu Ilaah jaceylnimadiisa uu inagu casuumay Giddigeen inaan rumeysanno Ciise MASiix iminka inta uusan wakhtiga idlaan. Waa wakhti dambe oo ka gaarid leh iminka.

## SIDEE BAAN KU HUBIN KARNAA WAXA AAN RUMEYSANAY?

Waa caadiyan oo la fahmi karo dhibaatada oo ay inta badan qabaan markey ka fekerayaan mowduucyada diimeed waana sidatan: Sidee ku garan karnaa waxa beenta ah iyo waxa runta ah? arrimaha ku saabsan sayniska oo indhahayaga hortooda ayaan ku cabiri karnaa oo miisaan ku saari karnaa. Sidee baan ku samaynaa middan ku saabsan arrimaha diinta? Caqiido qof aaminsan yahay bay qof kale bidco u tahay.haddii hawshoo idil tahay malo un, laga yaabee inaan rumeysanno keliya wax aan jirin oo ka guuxay maskaxda dadka. Haddii aysan jirin diidanaan heerbeegsi oo lagu cabirayo fekredaha diimaha, haddaba ma hubin karno inaba waxwalboo ku saabsan rumeysadka. Waxa u badan ee aan u baahanahay dabadeed waa inaan hubino qaynuunada ku qoran iimaankeena iyo dabeecad-dhaqameedka ku qaabeysan.

Qaynuunka rumeysadaka ma aha maskax bani'aadan ama dadeed mid ah ama mid dhaqan diimeed iyo caadooyin gacan remis ah oo duni diimeed ah: Ilah inoogama tagin meel cidla ah oo aan ku caddeyn isha aqoonta cilmiga garashada waxyaalaha rumeysadka iyo caabudidda. Meesha aan ka heleyno aqoontayada garashada Ilaah waa Kitaabka Qudduuska, oo ka kooban Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub.Axdiga hore wuxuu ku qoran yahay luqadda Cibraaniyadda (qayb yarna waxaa lagu qoray luqadda Aramayka.) inyar ka hor imaatinkii MAsiix laba kun oo sanadood ka hor. Axdiga Cusub wuxuu ku qoran yahay luqadda Giriigga oo lagy qoray inyar ka dib noloshii iyo adeeggii MAsiix mrkii uu dhameyey hawshii loo soo igmaday.

Masiixiyiinta waxey yidhaahdaan Kitaabka Qudduuska waa 'Waa Ereyga Ilaah' waana muujinta waxyiyeed. Wxuuna la mid yahay sida iftiin ka dhex hilaacaya meel mugdi ah oo ina tusaya inaga jidka. Wuxuuna u qaabeysn yahay sidii laambad (faynuus) sare uga ifeysa jidka nolosha. Waana xariiqda aan ku qiyaas qaadan karno ama aan ku cabiri karno inaan xukuno aragtiyooyinka diimaha iyo dhaqankooda. Haddii sheyga aan aaminsanahay ku dhan tahay isbedel la'aan weheliso waxbaridda Kitaabka Qudduuska oo deedna waxaan ku dhawaaqeynaa rumeysashada ama rumeysadka. Haddii aysan saa ahayn khalad baa jira, marwalba farta wuxu ugu fiiqaa oo u tilmaamaa dadka Kitaabka Qudduuska. Naxwaha Murtidana waa "Wey Qoran Tahay". Waxaa isticmaalay taasi Ciise si uu ugu fariisiyo qodob walboo ah aqoonta cilmiga iyo waxbariddiisii, ama ay la jirtay muranka doodda ku saabsan waxa la rumeysanayo iyo sida loo caabudo Ilaah. Waa inaan sidaa samaynaa inagana. Waa laga yaabaa waddo dheer oo khaldan ooy diin ku jirto oo aan si adagu u ilaalinayn nidaam iyo hab lagu tijaabiyo ama lagu cadeeeyo waxa aannu maqalno eek u jira waxyaalahaa rumeysadka diimeed iyo ku dhaqankeda. Masiix si cad oo waadax ah ayuu u tilmaamay fartana ku fiiqay so loo xasuusan karo. Wuxuuna yidhi taasi haddii iftiin nagu jiro yahay mugdi, sdee buu uga sii weyn yahay gudcurka! Taa micnahedu waxa uu yahay haddii aaan hesano iimaan iyo diin been abuur ah, waxaanu ka cabsanaynaa inaan ku dhex Milano xaaladda. Middani laga yaabee iney tahay dacwadda dad badan lagu heysto. Waxeyna aaminsan yihiin si joogta ah in waxyaalahan aysan kai man Kitaabka Qudduuska, oo ay tahay xaalad laga naxo. Intii ay u ahaatay Ciise MAsiix Wiilka Ilaah, ee loo soo diray dunida inuu wax inagu baro sidaan ku garan lahayn Ilaah. waxaa iangu waajibay inaan qaadano aragti la mid ah midda Kitaabka Qudduuska ee

uu Isaga qaatay. Ciise fikirkiisii Kitaabka Qudduuska uu ka qabay waxey ahayd mid si inoogu soo saaraysa inaga, waxaana laga helay afartii kutub ere Injiilka ahna afarta kutub ee ugu horreysa Kitaabka AXdiga Cusub. Baryadii Ilaaha Aabbahii markii uu baryayey, wuxuu yidhi ereyga ah waa “Run”. Wuxuu yidhi Ereyga Ilaah ma jabo ama ma buro ama ma baaba’o, xitaa haddii dhulka iyo samooyinka ay baaba’aan. Laakiin Ereygiisa ama baaba’o. Fekraddii uu Ciise MAsiix ka qabay Kitaabka Qudduuska ayaa sidaa ahayd. Waxeyna ahayd middii uu sida joogatada ah ugu so celcelin jiray oo aan isbedelak lahayn marwalba markuu dadka la hadli jiray. Si cad oo la wada maqlaya ayuuna uga hadlay waxyaalaha ka geeska ah eek a soo horjeeda qaar ka mid ahaa culimada diinta hoggaamiya maalmahaa ku dhex darsaday fikradahooda Kitaabka Qudduuska. Wuxuna baray in la ixtiraamo Kitaabka Qudduuska sida mar la aragga u yahay muujintiisa loo muujiyey dadaka. Wuxuuna u sheegay kuwa doonaya inay fekradaha dhaqan bani’aadimeedka ku darsadaan Ereyga Ilaah iney yihiin Dembiilayaal eedeysan oo laga qaaday ‘furihii garashada aqoonta.’ Taasi wuxuu ula jeedaa ama ay ka micne tahay waxbarashadi caddeyd ee aan qarsanayn ee Ilaah iangu siiyey Kitaabka Qudduuska, in la barbar dhigo waxbarid aan Kitaabi ahayn oo dadku ka keensaday maskaxdiisa oo aysan habooneyn xitaa in la dhegeysto.

Aragtidan Litaabka Qudduuska waa middii uu Masiix ina baray. Waa aragtidii Rasuulada ay ina bareen weliba, Butros, Yooxanaa, Bawlos, Yacquub iyo kuwii kale dhamaantood wax ka qoray Kitaabka Axdiga Cusub, Aragti isku wada mid ah bay ka sinaayeen oo ay ka qabeen Kitaabka Qudduuska. Middani waxey ahayd qaynuunka Masiixa io rasuuladii ana bareen oo la tijaabiyey oo lagu caddeeyey dhamaan waxbariddii diimed oo dhaqan gashay isticmaalkeda.

Loomana baahna in la adkeeyo wax iska weyddiinteena marka aan doondooneyno garashada Ilaah. Kitaabka Qudduuska waa iftiin aan u baahanahay inaga. Waxeyna ku dhan tahay inuu inoo keeno Ilaah. waa muujinta maskaxda Ilaah iyo doonista kuwa ku socda dunida. Kumanaan rag iyo dumar ah oo soo maray dunidan qarniyo badn hortood sida taariikhdii hore ku xusan ayaa noolaa oo dhintay deedna iyagoo qalbiyadooda rajada janada ku heysta, sababtoo ah Ilaah ereygiisa ayay yeeleen oo barteen. Kumanaan rag iyo dumar ah oo ku nool dunida dacaladeeda maanta, qaaradaha oo idil oo luqado kala duwan ku hadla ayaa iyaga qudhooda ka helay Ilaah akhrinta Kitaabka Qudduuska dhexdiisa oo maqlay farriinta kuna wacdiyey farriintaa dadka intooda kale.Ciise MAsiix wuxuu istcmaalay tusaale qoran oo caanka ahaa ee wacdigii buurta uu ku sharxay waxa aan ku fikirno, gaar ahaan kuweena ku nool nolosha Kitaabka Qudduuska,  iyo kuwa aan sidaa samaynin. Kuwa aaminsan Ereyga Ilah eek u nool sida ay tahay waxbariddiisa, oo lala simo ama lagu masaalo sdiii nin aqalkiisa dhagax ka dhisanaya, markii roobka soo da'o, dabayshana kacdo, daadkana soo rogmado oo biyahana dusha gaaraan, aqalkaa ammaankiisu wuu sugan yahay sababtoo ah dhagax buu ka dhisan yahay. Haddii aan si kale u dhigno, kuwa aaminsan wax uusan Kitaabka Qudduuska na barin een ka baxsan Ereyga Ilaah kuna nool noloshooda gaar ahaanayd ee aan ku xusneyn Ereyga Ilaah, waxey la mid yihiin sidii ninkii aqalkisii ka dul dhistay ciidda dooxa. Marka ay duufaanta dabeysha kacdo iska duma oo burbura.

Misaalkan wuxuu ina xasuusinayaa iney dooddan ku saabsan Kitaabka Qudduuska aysan ahayn mid istaahisho aragti ahaan iney tahay. Waa wax iminka iyo marwalbaba dhaqangal ah oo isticmaal-

keedu joogta yahay. Sida aan ka aaminsanahay oo aan ugu noolnahay waa wax uu Ilaah inagu tijaabinayo ISaga qudhiisa oo uu ku eegayo nolosheena ugu badnaan maalinta xukunka..haddii aan ku dhawaaqno rumeysadka oo aan ku noolaano iftiinka Ereyga Ilaah waannu badbaadi doonaa maalinka xukunka ugu dambeynta. Marka uu Ilaah baaro waxa ku jira qalbiyadeena iyo camalka nolosheena intey nooleyd maalinta xukunka, wuxuuna amar ku bixin doonaa in nala abaal mriyo oo nalugu abaal mariyo nolosha weligeed ah., haddii nolosheena aan ku dul dhisnay ama ku dhisnay wixii uu Kitaabka Qudduusk laynoogu dhex sheegay. Haddii aan ku socono ama qaadno aragti iyo qiyaa malo bani'aadmiyeed oo gacan ku samayn ah, siday doontaba ha u caansanaato ama ha loo qiimeeyee halaag bay ku dambayn doontaa maalinta weyn ee xisaabta ee loo taagn yahay xukunka. Ma wax ka muhiimsan baa jira mowduucan.

## MA HUBNAA INAAN BADBAADNAY?

Farriinta Ciise MAsiix waxaa loogu yeedhaa "INJIILKA". Ereryga micnihiisa waxaa weeye "WARKA WANAAGSAN" akhbaarta wanaagsan waxey tahay deeqda uu Ilaah si bilaash ah ku siinayo dadka nolosha weligeed ah dhamaan kuwa toobadkeena oo rumeysta Ciise Masiix inuu yahay badbaadiyahooda. Akhbaarta wanaagan lamma si siiyo dad dabaqad gaar ka soo jeeda, waxaa la siiyaa dhamaan umad walba oo maqasha taa iyada ah. Shuruudda keliya ay ku xiran tahay badbaadada waa inaan rumeysano un. Mar alla marka aan rumeysano MAsiix kol keliya waxaa inoo ahaatay oo aan heleynaa ballanka nlosha eek a timid Ilaah. umana baahnin inaan sugno Ilaa iyo iyo inta ay gaareyso saacadda dhimashada sida uu u dhigay

rasuul Yooxanaa waa si sahal ah oo cad fahmiddeeda:

(1 Yooxanaa 5:12) “Kan Wiilka haystaa, noloshuu leeyahy, kii aan Wiilka Ilaah haysanna nolsha ma leh” HAddaba kol alla kolka ugu horreysa oo aan aamino Wiilka Ilaah iney ku jirto badbaadada waannu badbaadnay.

Kolka aan badbaadno waannu badbaadnay weligeed. Suurtagalna ma aha qof si dhab ah u badbaaday inuu kol kale lumo. Balanta Ilaahna weeye taasi marka aan rumeysano Injiilkiisa waxaa inaga dagay dhamaan culaabtii ina saarneyd ee dembyadeennii oo nolosheenii oo idil waxey hoos gashay awoodda Ilaah ilaalinteeda ilaa aan ka dhimano oo aan ku galayno janada. Waxaan tixraacnay oo ku soo hadalqabsanay qaybtan ka tirsan waxbaridda cajiibka ah ee Injiilka “Adkaysi” dadaal iyo dulqaad hawl yelasho leh.

Rasuul Butros wuxuu ka yidhi taasi; “Idinku waxaad tihiin kuwo xoogga Ilaah iyo rumeysadka lagu dhawro ila badbaadad diyaarka u ah wakhtiga ugu dambeysta la muujiyo’ (1 Butros 1:5). RAsuul Bawlosna wuxuu caddeeyey “Ineysan jirin wax inaga sooci kara jacaylka Ilaah” (Rooma 8:39). MAsiix qudhiisu wuxuu sheegay mid la mid ah runtan xaqa ah markii uu lahaa “Oo nina kama dhufsan karo gacanta Aabbahay” (Yooxanaa 10:29). Haddaba Ilaah inama siinin inga badbaado laga shakiyo. Wuuna badbaadiyey rumeysatayaasha oo wuu dhawray badbaadadooda. Inta ay noolyihiin oo idil. Waana dhibaato jirta inaad leedahay nooc badbaado oo maalinna lunta oo haddana xitaa oo weliba dembiyada iyo khaladdaadka rumeystaha, iyagoo aad u xun, laguma soo celin karo kol labaad ama mar kale lunsanaantisii hore. Haddii ay sidaa dhacdo, ma hubin karno mana hubsan karno inaan inagu badbaadnay. Mar walabana

shaki iyo cabsi baa ina haysanaysa oo cabsidanna waxey u ahatay saxariir, kadeed iyo caddibaad badan.naxariisitiisa iyo jacaylkiisa ayuu rumeystayaasha ku siiyaa caymiska ay ku badbaadeen. Laga yaabee tixraaca caymiska inuu ahaado sida "Labeenta" badbaadada eek u jirta noloshan, tani waa farxad iyo raaxo u waarta kuweena leh Ilaah oo sida caruurtiisa Aabbaha leh oo kale. Waa farxad iyo reyn reyn xaqiijinta ama hubinta ineynu nahay iminka wiilashii iyo hablihii Ilah oo heysta jidkii ku hoggaaminayey janada. Hubaashan xaqiiqdeeda ee rumeystayaasha heystaan dusha ayey inoogu qaadaysaa xagga sare dhibaatooyink iyo waxaan la granayn ee qarsoon oo waxey inaga caawineysaa inaan eegno waxyaalaha ina horyaal ee u iman doona mustaqbalka noloshan. Haddii aannu naqaano deg-deg waxaa ula jiri doona amaanta Ilaah ku jirta,  maxaa sabab u ah ka dul bixidda dhibtii ay inyar ka welwelsanayd nolshii ama ilaalinteedii ama taxadarkeedii.

Ilaahay aad buu ugu naxariistaa rumeystayaasha kuwii uu siiyey in ka badan micno mid lagu hubinayo badbaadadooda. Waxakan waa shey marwalba run ku ah waxyaalaha ku saabsan Ilaah eek u jira Injiilka. Naxariistiisa aadka u badan ayaa buux dhaafisa deeqda kuwa iaga rumeystay oo hela wixii uu kula dhex balamay Kitaabkiisa Qudduuska. Sidan baan u dhigi karnaa. Ilaah marwawlba wuxuu sameeyaa wuxuu doono "WAxa uu jeclaado sameey". Marwalba waxa uu sameeya aama dabeecaddiisu tahay waxey ka turjuntaa wanaaggiisa iyo dabeecadda nimcadiisa. Ilaah weligeen ma falo waxaan ku habooneyn ISaga. Dhanka kale, aad buu hodan uga yahay naxariista; Ilaah jacaylkiisa cajiibka ah waa mid dhameystiran oo daacad ah. Waxaa jira hadalo ama tacbiiro ama odhaahyo oo uu isticmaalay oo ku jira Kitaabka Qudduuska dhexdiisa oo uu inoogu sheegay inaga waxyaalo ku saabsan dabeecadaha Ilaah.

Ugu yaraan waxaa jira saddex waddo oo uu Ilaah ku hubintii bixiyey dadkiisa iney badbaadeen. Waxeyna kala yihiin:  Dariiqa Kitaabka Qudduuska, Dariiqa ku cad isbedelka anaga nolosheena, iyo Dariiqa Ruuxiisa Quduuska eek u jira qalbiyadeenna. Bal aan ka hadalno qodobaddan:

Kitaabka Qudduuska wuxuu xambaarsan yahay odhaahyo badan oo qalbiga diirimad geliya oo inoo sheega inaga ka rumeystayaal inaa heysano xuquuq walba oon kaga fikirno inaan badbaadnay. Ciise Masiix wuxuun yidhi sidatan:

“Anigu waxaan ahay kibista nolosha, kii ii yimaada ma gaajoon doono, kii I rumeystaana ma haraadi doono weligiis” (Yooxanaa 6:35). Kol kale Ciise Masiix wuxuu inagu yidhi: “Anigu waxaan ahay nuurka dunida. Kii isoo raaca gudcurka kuma socon doono.” (Yooxanaa 8:12). Mar kale Ciise Masiix wuxuu yidhi: “ Idaheygu codkaygay maqlaan, waanan garanayaa iyaga, weyna i raacaan oo waxaan iyaga siiyaa nolosha weligeed ah, weligoodna ma lumi doonaan.” (Yooxanaa 10: 27-28). Micnaha guud eek u jira iyo ereyadaba waxey yihiin inuu Ciise MAsiix yahay SAyidkkeena iyo Badbaadiyaheena haya quudka/raashinka nafteena, nuurka waddada nolosha, iyo badbaadada eligeed ah ilaa iyo ugu dambaynta.

WAxaa jira waddadii labaad ee uu Ilaah ku hubiyey rumeyatayaasha oo dabadeed ku bed heleen. Waa dariiqa isbedelka ku yimid waxyaalaha ku saabsan nolosheena. Marka aanu noqwono caruurta Il aah dariiqa rumeysadka MAsiix dareenka caqliyan ma nihin dadkii markii hore sidaanu ahayn oo kale. rumeystuhu iminka waa qudduus xagga dabeecaddiisa.. tani ma odhan karno waa mid dhameystiran oo qofku daahir ku noqon karo, laakiin iminka qwalbigiisu waa

mid jacaylka Ilaah iyo wehelnimadiisa la jirto oo la jirto maskaxda rumeystayaasha. Middani kuma sanna runtii dadk kale. Dunida ma jecla Ilaah, mana jecla dadka Ilaah. ma fahanto uman mahad celiso. Laakiin haddii aan isu aragno inaga qudheena – in aan jecelnahay Masiix, Kitaabka Quduusk, la jiridda rumeystayaasha, baryada salaadda, iyo qaar badan oo addeecidda doonista Ilaah – doonis gudaha Ilaah eek a calaamado ahaan Iaga ku cararno xagiisa, waa wax laga xumaado runtii dadk qaarkood ayaa lagu arkay, calaamaddabn wakhti yar, laakiin deedna dib loogu jiiday dunida. Dadkaasi ma aysan ahayn caruurta Ilaah.

Caruurta Ilaah wey sii wadayaan waxyaalahan ilaa iyougu dambeynta, inta ka hadhsan noloshooda. Waddada sadexaad ee uu Ilaah ku siiyey caruurtiisa caymisak waa dariiqa saameynta gudaha ee Ruuxa Quduuska. Ruuxa Quduuska waa shakhsiga Ilaah sare. Adeegiidana waa gargaaraheena noloshan joogta iminka oo inoo diyaarisa sidii caruurta Ilaah ee guriga Ilaah ee samada.  Ruuxa wuxuu ku nool yahay nafsadda rumeystaha. Wuxuu ku shubaa nafsaddeena dareenka jacaylka Ilaahay inaga xaggan iyo nolosha iminkaba aann ku jirno. Waana naqaanaa raalligelintaa oo aan ku heysano dareenka uunka la jeclaaday ee lagu dhawray dariiqa bani'aadmi qofeed oo kale. In ka badan raaxeysiin ee ku jirta gudahan waayo-aragnimadeed ee diiran, jacayl, iyo nabadda ee Ruuxa Qudduuska ee Ilaah dhigay qalbiyadeena. Saameynta dareenka qalbiyadeena uu saameyo Ruuxa Ilaah mararka qaar waxaa loogu yeedhaa "Calaamad" ama wax ku xiran sheyga oo aan ka fuqeyn weligii ama markhaatifur micnaha kale ee loo fasiri karo. Saameyntaana waa ta inoo hubin karta inaan naqaano ama garaneyno Ilaah. Waa cahjiib wax ah aqoonta Ilaah ama inaan naqaano Ilaah. Laakiin waxaa ka sii cajiibsan weli inaan garano inaan ISaga naqaano. Waa xaqiq samada iney ka sareyso

dhulka. Mana aha wax rumeysataha adkeynayo, laakiin waxey ku sameynmeysaa farxad gelin iyo mahad naqid, waxeyna u sii jiid-eysaa inabadan isaga xagga Quduuska sababta oo ah waxaa isaga lagu qasay ma lagu dhex walaaqay eegidda sare iyo baryada doon-doonist Ilaah iyo sameynta doonistiisa.

## MAXEY INAG BAREEN MASIIX IYO XERTIISII WAXYAALAHA KU SAABSAN NAARTA?

Kala duwanaanta u dhexeysa rumeystaha dhabta ah iyo kan beer abuurka ah waa tan:  midda la qaadan karana dhamaan inuu Ereyga Ilaah uu wax inaga bari karo weeye. Halka rumeysashada kale ke-liya ay tahay wax dawiyaya isaga. Waxaa jira waxbarid isugu jirta macaan iyo khadhaadhba oo ku jirta Kitaabka Qudduuska dhexdiisa – waxyaalo ina farxad geliya iyo waxyaalo aan ka xumaano. Xaqna uma lihin keliya inaan rumeysano waxyaalaha fiican/macaan ee ina maqsuudiya. Waa inagu waajib inaan qadano waxa uu Ilaah yidhi oo idil, sabatoo ah waa laynoo waxyiyay oo awiiddiisa rabaaniga ah wata. Kana takhalusa ama iska tuura qaybo Ereyga Ilaah ka tirsan oo aynu jecleyn inaga oo ka dhigno Ilaah beenaale ah. taas qudheeda oo la mid ah ineynu ahayn caruurta Ilah. Caruurtas Ilaah oo idil iskud-uub bay ku qaataan Ereyga Ilaah weyna aqbalaan wax walba oo ku qoran Kitaabka Qudduuska.  Ma jiron qof akhriyey kitaabak Axdiga Cusub oo ka shakiyey MAsiix iyo RAsuuladiisii iney ina bareen inaga in ay jirto meel lagu magacaabo Naar. Waxaa jira tixraacyon inta badan kitaab walba oo ka mid ah kutubka Axdiga Cusub ku cad.

Si dhakhsiya ah, Masiix wuxuu inooga sheegay wacdintii buurta waxyaalaha ku saabsan dadka midho la'anta ku nool ee ah kuwa lagu dhex tuuri doono ololka dabka. "Geed kastoo midho wanaagsan dhalin waa la tuuraa." (Matayos 7:19). Wuxuu inooga digay inaan dadka ka cabsan, laakiin Ilaah keliya Kan kara inuu burburiyo jidhka iyo nafsadaba kuna rido naarta. Ereyga Ilaahna wuxuu leeyahay sidatan: "Ha kabaqin kuwa jidhka dila, laakiin aan karin iney nafta dilaan, waxaadser ka baqdaan kan jahnamada ku haleyn kara nafta iyo jidhkaba" (Matayos 10:28).Masiixna wuxuu inoo sheegay iney wanaagsan tahay in la jaro waxwalba naga hor istaagyo inan galno janada intii nalugu tuuri lahaa jahnamada. Jahnamadu waa me3el ay joogaan 'dirxiyo aan dhimaneyn iyo dab aan dameyn inaba' Ereyga Ilahna waxaa ku sidan:- "Haddii gacantaada ku xumeyso iska jar; waxaa kuu wanaagsan inaad gacan la'aan nolosha ku gashid intii aad adigoo laba gacmood le hula tagi lahayd jahnamada ee ah dabka aan la damin kareyn" – "haddii ishaadu ku xumeyso, iska bixi waxaa kuu wanaagsan inaad boqortooyada Ilaah gashid adigoo il keliya leh intii adigoo labo indhood leh laguugu tuuri lahaa jahanamada. Oo ah meesh dixirigooda uusan ka dhimaneyn, dabkuna uusan ka dameyn." (Markos 9:43,47,48). Wuxuu ku qeexay xaaaladaha dembiilayaasha lumay ay ku sugnaan doonaan. Ninkan farxad la'aanta ah taajir buu ahaan jiray markii uu ku noola dunidan, lakiinse iminka saxariir, caddibaad badan, iyo kadeedka jahanamada buu ku jiraa."Intuu Haadeeska ku jiray ayuu indhihiisii kor u qaaday isagoo aad u silcaya, wuxuuna meel fog ka arkay Ibraahim iyo Laasaroos oo laabtiisa ku tiirsan. " (Luukos 16:23). Middan iyo qoraale gaagaaban oo kale ayaa lagu caddeeyeyn in Masiix baray dadaka dhab aahaantii xaqiiqda meesha ay tahay waxa loogu yeedho Jahanamada.

Waa wax la fahmi karo in dadkaa aan jecleyn in lagala hadlo waxyaabaha ku saabsan jahanamada. Waana erey aad u murugeysan oo huimmad xun ku dhawaaqiddiisa. Fekerkeena waa mid ina cabsi geliya in doonista Ilaah maalin un ay dadka ka takoori doonta, jidhka iyo nafta, oo ay un ahaan doonto dabaka weyn ee abadiyanka ah. Waxey u egtahay iney labadaraadlaba ingeyg iyo gef la qoonsan karo u ahaan doonto sitaa haddii ay ka hadlaan waxyaalaha ku saabsan naarta jahanamo. Laakiin haddii meeshaa oo kale ay jirtaba, ka Masiix ahaan iyo xertiisaba wey inoo sheegeen. Dabadeed nacasnimo ayay inagu\ tahay inaan ska indho tirno waxbariddan. Dahbtii waxaa jira sababo wanaagsan waayo waa inaan ka mahadinaa in naloo sheegay waxyaalahan ku saabsan Jahanamada. Waayo, hal shey keliya, swaxaan u baahanahay inaan aragno in Ilaah inoo sheegay inaga waxyaalaha ku saabsan Naarta Jahanamo ee laynooga digay inaga naga geeska halka ay ku dhamaan doonto aakhirka. Meeshaa. Haddii ay marad calaamadda ka lulato mowjadaha waddad jaceylka diiran ee xeebta halkaasey ku egtahay dhammaadkeeda. Inta aan joogno, waxeynu nahay ama noqoneynaa nacasiin uman hmahadcelin digniinti nala siiyey. Haddii aan naqaano ama ognahaydiyaaradda aan sugeyno inaan raacno la hubo iney dhaceyso markey duusho, maba raaci akrno marka horeba inteysan duul sow ma aha. Haddaba taasi waa jahanamada hadii ay yimaadaan dad aan rumeysneyn Ilaah, ama Injiilkaba, waxaa loogu naxariisan karaa oo keliya in loo digo un. Rajaduna waa taa in waddada dadka loogu bilaabo doono iney tahay doondoonista Ilaah iyo bilowga baryada loogu bixinayo dareenk soo jeedista Injiilka iyo Masiix. Haddaba, waa calaamadda Ilaah wanaagiisa iyo naxariistiisa uu Iaga inoogu sheegayo waxyaalaha khuseeya jahanamada wakhtiga ku haboon ay tahay. Dadka caqliga leh wey qaataan suurtgalidda tallaabadan

ay isugu diyaarinayaan ineysan weligood meeshaa aadin. Deedna middaas Kitaabka Qudduuska wxa uu inaga barayaa waxyaalo ku saabsan naarta weyna inoo wanaagsan tahay dhamaanteen iminka, oo weyna u wanagsan tahay bulshada oo idil jamac ahaan. Dembiga ma aha un keliya erey - waa wax xaqiiq ah oo jira – Dilka (gacan ku dhiiglanimada), sinada, silcinta, cadaadinta, iyo tuugnimada - iwm. Waxaa soo idil waa dhibaatooyinka ka taagan dhab ahaan dunida. Aad bayna ugu dhakhsadaan oo dardar geliyaan dowladaha iyo booliska marar badan cabsigeliya sidii loo xakamadeyn lahaa iyaga. Dembga waa waji ay leedahay nolosha kumanaan qof oo ka mid ah dadkuna aysan daryeelin sirta ku aasan ayaa kala geysa kuwa kale waa haddii keliya iyagu helaan waxa ay doonayaan. Haddaba dadku meelwalba oo ay joogaqan waxey u baahan yihiin in loo sheego waxyaalaha ku saabsan jahanamada. Waxbaridda cilmiga ciqaaabta da'inka ah, xita marka ay la noqon weydo dadku iney u soo noqdaan Ilaah. laga yaabee iney natiijada cabsigeliso dadku wax aka iman karo dembiga. Haddii ay ogyihiin in la ciqaabayo dhimashada ka dib dembiyadeena noloshan awgeed. Dad badan baa iska deyn lahaa ama doonay ama ka fogaan lahaa – ka rajaynta in lagu tuuro dabka jahanamada. Lakiin sababta ugu weyn ee uu Ilaah inoogu sheegayo ereygiisa waxa ku sabsan jahanamada waxey inoo horseedeysaa inaan toobad keeno oo aan rumeysano. Sababtani weeye waxa ay wacdiyayaaln farabadani ay dadka ugu wacdiyaan, sida Masiix iyo rasuuladiisiiba ay ugu wacdiyeen, sanadao badan la waday wacdinteedii ku saabsanayd jahanamada ururadoodii. Waxaa kaloo jira xalqad uu Yooxanaa Baabtiis kula hadlay eayo adag dhegeystayaashiisii, 'Wuxuuna ku yidhi dadkii badnaa ee isu soo baxay inuu baabtiiso iyaga, dhal jilbisey, yaa idiinka digay inaad ka carartaan cadhada imaaneysa' (Luukos3:7). Dembiga, a aha

wax yar oo iska fududdembiilayaasha Ilaah hortiisa waxey l;a mid yihiin mas sumeysan oo waabaay leh. Wey dhaawici karaan ama dili karaan uunka intiisa kale sida ay abeesada aalaaba sameyso. Akhbaartan digniinta ah ma aha weliba wax iska caadi ah ama la dhayalsan karo. Waa cod buun dheer lagu afuufayo oo ay dadaka wada arkayaan waxa ay la kulmi doonaan iyo silica horyaalla haddii aysan ka toobadkeenin intey goori goor tahay.haddaba waxaa sida runta loogu sheegayaa inay sida ugu dhakhsaha badan ugu yaraan uga baxsdaan cadhadaa ku soo fool leh cawaaqibkooda.

Cadhadan waxba kama yara xukunka Ilaah uu xukumiyo ku noolaashaha dembiyadeena. Taasina waxey la mid tahay sidii inagoo galnay xabsi daa'in ku yaalla duni kale aoo aysan ahayn tan aan joogno iminka. Waa inuu na ciqabaa Ilaah gafefkeena awgood iyo rumeyn la'aanta iyo addeecid la'aanta amaradiisa. Waa in nalagu tuuraa harada dabka, oo halkaa nalagu daayo. Waa iyadoo latagay mel gudcur ah, oo ka fog Ilaah iyo xaadirnimadiisa naxariiseed. Waaa wax abidiyan weligeedba lala jaar noqon doono sheyddaanka.iyo ibliisyada kale. ma wax ka xun baa jira oo ka sii cabsi badan taasi. Waannu ka rajo dhignay haddiiba laynoo sheegay jahanamada oo aannu naloo sheegin sdii looga baxsan lahaa taasi. Nimcada Ilaah iyo naxariisteeda ayuu inoogu sharxay Ereygiisa sidii aan uga baxsan lahayn.

Injiilka Masiix ayaa ah farriinta inoo sheegeysa malaha inaan 'ka cararno cadhada iman doonta.' Oo aan ka baxsano argagaxa hantidaa gaar u ah dembiga ku jira qalbiyadeena, oo ciqaabta cabsida leh eek a soo holcaysa moofada naarta dabaka daran. Farriinta Injiilka waxey tahay sidatan: Ciise Masiix, Wiilka abadiyanka Ilaah, wuxuu yimid dunidan laba kun oo sanadood ka hore inuu u dhinto

inaga booskeena iskutallaabta dusheediin ayuu Ciise tagay isagoo juuq lahayn oo aamusan xanuun dartii iyo slicba weheliyaan. Jacaylkiisii weynaa ee ku aadanaa dembiilayaaasha masaakinta ah. Ilaah wuxuu dul dhigay Ciise Masiix ciqaabtii iyo Saxariirtii ay inoo ahayd inaga iyo waxa aan geysanay in laynaga gudo.sidaana weeye caddaaladda Ilaah iney u ahato mid daahir ah oo raalligelisa.

Xitaa inkastoo aannu dembiilayaal an isbixn karin aanu ahayn, laga yaabee inaan heleyno ammaanta janada/samada oo idil markaanu dhimano ka dib. Middani waa xaqiiqdeena aan shakiga lahayn oo aan ku naaloon doono reynreynteeda aan noloshan dhexdeeda uga toobadkeeno dembiyadeena oo aan aamino inuu Masiix inoo yahay badbaadiyaheena.

Kitaabka Qudduuska wuxuu caddeeyey oo ku qoran ku alla kii rumeystaa Wiilka Ilaah inuu leeyahay nolosha weligeed ah. si kale haddii aan hadalka u dhigno, ku all kii aan addeecin wiilka Ilaah inuusan arkeyn ama heleynin nolosha, laakiin ay u ahaatay kuna hadhay korkiisa cadhada Ilaah waxaad akhrin kareysaa ereyada ku jira Injiilka sida uu u qoray Yooxanaa, cutubka 3aad, aayadda 36aad oo ina leh: “Kii Wiilka rumeysta, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, kii aan Wiilka rumeysanse, nolosha ma arki doono, laakiin cadhada Ilaah ayaa ku taal isaga”.

## MAXEY INAGA BAREEN MASIIX IYO XERTIISII WAXYAALAHA JANADA YAAL?

Ilaah wuxuu inaga abuuray u ekaantiisa. Oo waxaan farxad buuxda heleynaa marka aan helno farxaddiisa. Kolk aan akhrino Kitaabka Qudduuska waxaan ku arkeynaa waxa uu ahaa qorshihiisii, mana aha rumeysatayasha in la siiyo farxad sare oo xaggan dunida ah, laakiin faraxadda waxaa la siiyaa dunida iman doonta. Taasina waa janada. Masiix iyo xertiisiina in badan bey ka hadleen waxyaalaha ku saabsan barakada taala xagga dunida sare.

Waa inaan u diyaar garownaa qudheena dacaayadaha, xitaa ku jeesjeeska marka aanu ka hadleyno waxyaalaha ku saabsan janada. Waxeyna la mid tahay sababta runta ah ee dadka dunidan ay u qaataan farxadda raaxada eek u jirta uunka kaftanka. Markey ina maqlayaan ka hadalka waxyaalahan ku saabsan mowduucan janada. Taasina waa runta la mid ah marka aynu bilowno ka hadalka ku saabsan waxwalba uu sameeyo Ilaah kuna socota rumeystayaasha jeesjeeskan iyo  katankan malaheeda fikirkiisa. Waa caddeynta sii caddeyneysa in Kitaabka Qudduuska saxan yahay marka uu inoo shegayo in qalbiga dadka yahay mid qariban. Haddii uusan

qaribneyn, dadku way kareen oo karaan iney ku farxaan ka hadalka waxyaalaha ku saabsan farxadda dunida samada taaalla meesha ay xaqnimada oo idil taalo oo lagula weheshan doono Ilaah ugu dambeynta.

Inta ay janada tahay meesha iyom waddan sare fekerkeena oo idil ama maleynteenaba, Ilaah wuxuu inoogu sawiray Ereygiisa dhexdiisa oo ku timid tusaalooyinkaa badan ee uu inagu siiyey. Mid walbana axey xambaarsan tahay muuqaal qaabeysan ama waxyaalo kale oo cajiib dabiici oo dunidan samaawiga yaalla, u ahan doontana "Nasasho abidiyan ah" dhammaan kuwa uu Ilaah jecel. Haddaba aan akhrino in taasi ahaan doonto 'Caasimad' boqortooyo, guri qolal badan leh, samooyin cusub iyo dhulal cusub. Meelaha samada sare dadka degan oo idil wey ka badbaadi doonaan waxyeeleenta oo idil, xor beyna ka ahaan doonaan cabsida, waxwalba oo baahidooda ahna, waxaana ka buuxsami doona naxariista barakooyinka iyo qalbi qaboojinta ka dib dhibkii soo maray markii ay dunida joogeen umana baahnaan doonaa wax mashquuliya oo ilaaliya sida nagu heysata noloshan, haddii ay noqon lahayd lacagta, shaqaada ama quutal adruuriga maalinle raadintiisa. Doonista Ilaah waa waddo cajiib ah oo uu ku siiyo iyaga waxwalba oo ay u baahdaan. Agjoogga ama ku dhawaashaha doonista Ilaah ayaa noqon doonta inay fool ka fool u arkaan ayna la hadli karaan Isaga.  W3ey garan doonaan jaceylk aiyo jeclaanta ku aadan saddexda shakhsiyood ee barkadeysan ee Ilaahnimo, Aabbah, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska. Rumeyatayaasha amaanta ayaa ka dhalaali doonta sida nuurka qoraxda oo kale. Jidhkooda soo sare kacayna daahir baa loogu meeleyn doonaa inta samada ku meereysan.

Rumeysta walbab wuxuu jeclaan doonaa kuwa kale weyna iswada jeclaan doonaa. Samada waa dunida nuurka, farxad, iyo jaceyl leh. Qudduusnimada wey ka wada siman yihiin uunka meeshaa jooga oo idil – ragga iyo dumarkii dib loo helay, malaa'igihii, iyo Kan ka sareeya gididgood. Ilaaha weyn bay ammaani doonaan jeclaan doonaan Ilaaha Qudduuska ah. Weyna u mahad celin doonaa Ilaaha wanaagga hadal la'aantiisa. Samada qaar ka mid ah rumeystayaashaa axey lahaan doonaan xushmada dheeraad ah markii loo eego kuwa kale, sababtoo ah noloshan bey si daacnimo ah ugu adeegeen Ilaah. Tanna wa abaal-marintoda. Laakiinse ma jiro wax hinsiso hinaase ah oo ka dhexeyn kara mid walba oo jooga janada. Kuwa la xushmeyyena waxey tusaan heerka ugu sareysa ee anxariista kuwa kale ee wax ka dhinaadeen dhamaantoodna wey ku qanacsan yihiin wixii la siiyey. Inkastas oo ay jiri doonto darajooyin kala duduwan oo ku saabsan amaanta , dadkoo dhan Ilah faraxad badan gelin doona oo waxaa ka buuxsami doono oo ay gaari doonaan heerka ugu sareeya oo ay la jirto reyreyn iyo farxad. Haddaba Ilaah wuxuu ka dhigi doonaa idilkoodba kuiwa farxsan. Waxeyna u ahaan doontaa dadkiisa xaaladdda ugu dembeysa ee ammaanta. Wxey u soo bixi doonaan in naxariis walba ay ku sameeyaan nolosha Ciise Masiix dartii oo dadkiisan waxaa u aahn doono wax aad u badan oo abaalmarin ah dunidaiman doonta dhexdeeda. Xitaa haddii ay naxariistaasi loo tiriyo in ka badan koob biyo qabow oo la siiyey, waa loo celin iyaga xisaab ahaan Masiix qudhiisa ugu dembeynta. Inta lagu jirop gabagabbada ugu dembeynta xaaladda samada ee rumeystayaasha wey garan doonaan waxa fog iyo hodantinimada buuxda tubteeda, inta ay joogaan dhulka dushiisa. Xaadirnimada fahmiddooda ku aadan ilaa iyo jidadkiisa waxey la mid tahay in sidii ilmaha marka ay yar yihiin oo kale. laakiin fahmiddeena Ilaah waxey ku jirtaa ammanta ahaan doonto mid baaxad weyn oo saree e ugu weyn.

Halka waxaan ku arki doonaa Ilahab waxwalba u sameeyey bani’aadanka taariikhdiisa iyo nolosheena qudheeda ee ay la jirto xaikmadad daahirsan. Halkaa waxaan ku arki doonaa in xitaa maxkamada qaadiddii iyo sharkii noloshena dhulka oo dhamaan loo rogay wax wanaagsan. Dariiqadda Ilaah ee inoo ahaatay inaga iyo kuwa kaleba noloshan dhexdeeda iyo geerida waxaa lagu arki doonaa nuurka runta ah. ugu dambeyntii rumeystayaasjha waxey arki doonaan in Ilaah waxaasoo dhan u sameeyey wanaag. Farxaddan oo idil – si weyn oo baaxad leh in ka badan kama ogaan karno – ama kama sheegi karno. Waxaa lagu dari doonaa middan: in farxad samada taal tahay mid weligeed waareysa. Wakhtigana ma iman doono markii barakadan idlaan doonto.

Waa kuma laakiin ka doqomoowi doona doonista – lumiso farxadda janada? Waxey ka bilaabataa dhulkan (Dunida), kol haddeyno garano Ilaah inuu iskugu muujiyey Masiix.

ETHIOPIA MERF TRANSLATED